



## Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Guddiga Qaran Ka-hortaga Lacag dhaqida & La-dagaalanka Maalgelinta Argagaxisada (GQKL/LMA)

National Anti-money laundering And Counter the Financing of Terrorism Committee (NAMLC)

SUM: GQKL/LMA/002/24

TR: 18/07/2024

### Liiska Cunaqabateynta Maaliyadeed

Guddiga Qaran Ee Ka-hortaga Lacag Dhaqida & La-dagaalanka Maalgelinta Argagaxisada (GQKL/LMA) National Anti-money laundering And Countering the Financing of Terrorism Committee (NAMLC), wuxuu si waafaqsan qodobka 6aad ee Sharciga cunaqabateynta maaliyadeed ee cayiman 2023 soo saaray liiska qaran ee astaynta shaqsiyaadka katirsan kooxda argagaxida ah ee Alshabaab.

Sidaa darteed, dhammaan hay'addaha warbixinada ee ku xusan qodobka 4aad<sup>1</sup> ee sharciga ka-hortaga lacag dhaqidda & dagalaanka maalgelinta argagaxsida, muwaadiniinta Soomaaliyeed & shaqsiyaadka ama hay'addaha kale ee jooga gudda Soomaaliya:-

- 1) Waxaa ka reeban in ay la macaamilaan shaqsiyaadka ku jira liiskan
- 2) Waxaa waajib ku ah in ay xayiraan hanti kasta ay leeyihiin shaqsiyaadka ku xusan liiskan;
- 3) Waxaa sidoo kale waajib ku ah in warbixin deg deg ah ku saabsan dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed shaqsiyaadkan u diraan xarunta warbixinada maaliyadda Financial Reporting Center (FRC).

<sup>1</sup>Hay'addaha maaliyadeed; Qareennada, nootaayooyinka, xirfadlayaasha kale ee sharciga ee madax-bannaan, xisaabiyeyaasha & shirkadaha ka ganacsada hantida maguurtada ah.

### Xaqa Shaqsiyaadka ee Guddiga Qaran Asteeyey

Qofka ku xusan liiskan ee dareemaya in si khaldan loo asteeyey, waxaa si waafaqsan qodobka 8aad ee sharciga cunanqabateynta maaliyadeed ee cayiman u furan, in uu u dacwodo guddiga qaran, si loo qiimeeyo astayntiisa wax ka badalna loogu sameeyo hadii loo arko munaasib. Waxaa waajib ah in uu soo gudbiyo cadaymo maangal ah, sugaya in uusan ku lug lahayn maalgelin argagaxiso.

Hadii uu ku qanci waayo jawaabaha guddiga qaran ee astaynta, waxaa dhibanaha u furan in uu u dacwodo maxkamada sare ee dalka, si waafaqsan qodobka 9aad ee sharciga cunanqabateynta maaliyadeed ee cayiman 2023.

### **Liiska Magacyada La cunaqabateeyay**

No	Magaca	Naaneys	Xilka	Qabiilka	Da`da	Faallo
1.	Abuukar Cali Aadan	Cabdullaahi Garweyne, Xijaama	Kuxigeenka Horjoogaha Kooxda	Gaaljecel, Abtisame	55-60	Waxa uu kaalin weyn ku leeyahay qorsheynta iyo isku dubaridka hawlaha la xariira ciidanka.
2.	Maxamamed Mire Jaamac	Mire	Horjoogaha Wilaayaatka	Majeerteen, Idigfacle	59-62	Waxaa uu hoggaamiyaa uuna jiheeyaa horjoogayaasha gobollada iyo shaqooyinka ay qabtaan.
3.	Xasan Yacquub Cali Bari	Khawlajaan, Abu Cabbaas	Horjoogaha Shuurada	Leesaan, Bari	55-60	Waxaa uu saameyn ku leeyahay jiheynta istiraatiijiyadda guud ee kooxda iyo go`aannada ay gaaraan Majliska Shuurada.

4.	Mahad Abdirahman Warsame	Karatay, Qaley, Abuu Cabdirahman	Kuxigeenka Horjoogaha Kooxda	Habargidir, Cayr	60-63	Waxa uu hoggaamiyaa hawlaha amniga, maaliyadda iyo warfaafinta.
5.	Yuusuf Axmed Xaaji Nuunow	Geescadde, Bishaar	Horjoogaha Amniyaatka	Yantaar, Mad-dheerow	45	Waxa uu qorsheeyaa, kormecraa fuliyaa falalka amniyaatka, qaraxyada iyo dilalka qorsheysan
6.	Cabdikariin Cismaan Jilacow	Mustaf Caato	Madaxa Amniyaatka Gobollada	Xawaadle, Cabdalle	40-45	Waxa uu hoggaamiyaa amniyaatka, qaraxyada iyo dilalka qorsheysan ee gobollada
7.	Nuur Cabdi Rooble	Nuunuule	Horjoogaha Jabhadda Mudug	Duduble	35-40	Waa horjoogaha maleeshiyaatka jabhadaha ee gobolka Mudug. Waxa uu udub dhexaad u yahay dagaallada kooxda ee gobollada dhexe
8.	Bakar Baashe Aadan Axmed	Shariif	Xisaabiyaha Zakawaatka	Asharaaf	45-50	Waxa uu qaabilsanyahay aruurinta zakawaatka, iyo baadda laga qaado ganacsataada deegannada Bay & Bakool

### ***Wabillaahi towfiiq***

*Kala soo xiriir*

Guddiga Qaran Ka-hortaga Lacag dhaqida & La-dagaalanka Maalgelinta Argagixisada (GQKL/LMA)

E-mail: [info@namlc.gov.so](mailto:info@namlc.gov.so)

Guddiga Qaran Ka-hortaga Lacag dhaqida & La-dagaalanka Maalgelinta Argagixisada (GQKL/LMA)

[www.namlc.gov.so](http://www.namlc.gov.so)

Muqdisho – Soomaalida